



Madaxtooyada Dawladda Puntland War-saxaafadeed

TIX/00102/2018
May 24, 2018

Dawladda Puntland waxay usheegaysaa Ummada Soomaaliyeed iyo Beesha Caalanka in saaka Arooryo Abaara **5.30** subaxnimo ay marka kale Soomaaliland soo weerartay Ciidamada Puntland ee ku sugan deegaanka Tukaraq.

Dawladda Puntland waxay caddeynaysaa in mas'uuliyada dagaalkaas uu qadayo Maamulka Hargeysa oo ah duulaan joogto ah, isla markaana Puntland ay difaacayso dalkeeda iyo dhulkeeda.

Dawladda Puntland waxay usheegaysaa shacabkeeda dhammaan gudo iyo dibad-ba in ay garab istaagaan ciidamooda, isla markaana ilaashadaan sharaftooda iyo dawladnimadooda duulaanka lagu yahay.

Dawladda Puntland waxay u sheegaysaa shacab-weynaha gobolka Sool inay u diyaar garoobaan difaaca dalkooda iyo karaamadooda ee duulaanka lagu yahay.

Ugu dambeyntii Dawladda Puntland waxay u sheegaysaa shacabka Puntland inay ilaashadaan sharaftooda iyo dawladnimadooda.

Xafiiska Afhayeenka Madaxtooyada Dawladda Puntland
E-mail: - spk.oop@plstate.so, spofgovpl@gmail.com
Website: www.plstate.so